# Takoorka jinsiyadeed ee shaqada: waa maxay xuquuqdaydu?

**Ka shaqaale ahaan, waxa lagaa ilaaliyaa takoorka jinsiyadeed sida uu qabo *Sharciga Fursadaha Loo Siman Yahay 2010* (Vic).**

Sida uu qabo Xeerka Fursadaha Loo Siman Yahay, waa sharci darro in shaqaalaha lagu sameeyo takoor ku salaysan jinsigooda. Tan waxaa qeyb ka ah midabka maqaarka, faraca ama abtirsiinta, dhalashadooda, asalka qowmiyadeed, ama sifooyin kasta oo la xidhiidha isir gaar ah (in si gaar ah lagaaga reebay maahane).

Sida uu qabo *Xeerka Dulqaadka Jinsiga iyo Diinta 2001* (Vic), cayda – si fagaare ah loogu kicinayo nacayb ama jeesjees ku salaysan diinta iyo/ama jinsiyadda – sidoo kale waa sharci darro.

## Halkee ayaa shaqaalaha isir takoorka looga ilaaliyaa?

Sharciga Fursadaha ee loo Siman yahay ayaa dadka kaga ilaaliya takoorka meelaha muhiimka ah ee nolosha dadweynaha, oo ay ku jirto shaqada. Jinsi takoorka wuxuu ka dhici karaa goob kasta oo shaqo ama urur kasta mar kasta oo ah inta shaqadu socoto.

Shaqaalaha (oo ay ku jiraan shaqaale mushahar qaata, kuwo tababar ku jira oo mushahar qaata iyo codsadayaasha shaqada) iyo qandaraaslayaasha waa la ilaaliyaa:

- shaqada
- meelaha la wadaago (barkinada, wiishashka, meelaha qaabilaada iyo musqulaha)
- inta lagu guda jiro dhacdooyinka la xiriira shaqada, shirarka, iyo goobaha (tusaale, xaflad ama safar shaqo)
- goobaha internetka.

## Sidee bay takoorka, aflagaadada iyo dhibaatada qofka loo geysto ee goobta shaqada u egtahay?

Xeerka Fursadaha Loo Siman Yahay waxa uu mamnuucayaa takoorka goobta shaqada. Tan waxaa ka mid ah takoorka jinsiyadeed ee ay geystaan milkiilayaasha loo shaqeeyo iyo shaqaalaha kale. Tusaalooyinka waxaa ka mid noqon kara midab-takoor u dhexeeya dadka (labadaba mid cad iyo mid aan qarsoonayn), gardaro yar, eexda ururka, iyo nacay loo qabo baahiyaha dhaqanka.

- **Takoorka jinsiyadeed** waxay noqon kartaa mid toos ah iyo mid dadban labadaba.

  **Takooridda tooska ah** waa marka qof uu qof kale ula dhaqmo si aan xaq ahayn isirkiisa awgeed.

  > ***Tusaale ahaan:*** *milkiilaha loo shaqeeyo ayaa diiday inuu aqbalo ama furdaamiyo codsiga codsadaha Ummadaha Koowaad (First Peoples) sababo la xiriira malo iyo fikardo qaldan oo laga qabo taas oo ku saabsan xirfadahooda ama anshaxa shaqada.*

  **Takoorka aan tooska ahayn ee jinsiyadda** waa marka ay jirto shuruud aan macquul ahayn, sharci ama dhaqan goobta shaqada kaas oo waxyeello u geysanaya ama si aan caddaalad ahayn u saameeynaya shaqaalaha sababo la xiriira jinsiyaddooda.

  > ***Tusaale:*** *Shirkad ayaa waxay dejisay isla markaasna xoojisay nidaamka labiska ee dhamaan shaqaalaha kaas oo ka mamnuucaya shaqaalaha inay xidhaan wax kasta oo madaxa lagu xidho*

*goobta shaqada gudaheeda, taas oo wax u dhimaysa shaqaalaha madaxa ku xidha dharka diinta ama dhaqanka.*

- **Aflagaado** waa hab-dhaqan guud ah oo ku dhiirigalinaya dadka kale inay nacaan ama ku jeesjeesaan qof ama koox dad ah iyadoo taasna loo sababeynayo midabkooda ama diintooda. Si aad u fahamto farqiga u dhexeeya cayda iyo takoorka jinsiyadda, eeg 'Cutubka 3: Fahamka sharciga ee cunsuriyadda goobta shaqada' ee ***Tilmaamaha: takoorka jinsiyadeed ee goobta shaqada***.

  ***Tusaale:*** *Shaqaale ayaa wuxuu ku eedeeyay saaxiibkiis inuu yahay 'wakiil shisheeye' sababo la xiriira jinsigooda iyo 'inay helaan siraha warshadaha si ay u siiyaan dawladooda' wuxuuna ku dhiirigeliyay dadka la shaqeeya inay nacaan dhammaan dadka ay asal ahaan ninkaas isku meel kasoo jeedaan.*

- **Dhibane** waa marka shaqaalaha loola dhaqmo si xun sababtoo ah waxay soo bandhigeen arrin ama waxay sameeyeen cabasho ku saabsan takoorka jinsiyadeed ama midab-takoorka ama dhaqan kale oo sharci darro ah.

  ***Tusaale:*** *Shaqaale soo sheegay in maamulahooda uu isticmaalay aflagaado isir ah mar la sheekeysanayay ayaa si cadaalad darro ah shaqada looga ceyriyay sababtuna waxay tahay isku daygaas ay isku dayeen inay soo sheegaan dhacdo takoorid ah.*

## Maxaan samayn karaa haddii aan goobta shaqada kala kulmay midab-takoor?

Haddii aad goobta shaqada kala kulantay isir takoor ama aflagaado, waxaad la xiriiri kartaa Guddiga Fursadaha Sinaanta iyo Xuquuqda Aadanaha ee Victoria wixii macluumaad ah ama si aad cabasho u gudbiso.

Guddigu waxa kale oo uu leeyahay meel lagu sheekaysto oo si qarsoodi ah la isugu xog wareysan karo laguna soo sheegi karo\ waxyaabaha cunsurinimada ah taas oo kaa caawin karta inaad fahanto xuquuqdaada isla markaasna aad soo sheegto takoorka iyo cayda jinsiyadda.

Waxaad ka wici kartaa Khadka Guddiga ee lacag la'aanta ah 1300 292 153 ama booqo websaydkayaga humanrights.vic.gov.au.

| Ururada kale ee aad kala xidhiidhi karto wixii macluumaad dheeraad ah | |
|---|---|
| **Gargaarka Sharciga ee Victoria (Victoria Legal Aid)** | Adeegyada sharciga ee lacag la'aanta ah ee lagu taageerayo dadka ay heysato dhibaato sharci oo ay ku jirto cunsuriyadda, takoorka, dhibaataynta, iyo cagajuglaynta.<br>**Taleefanka** 1300 792 387<br>**Online** legalaid.vic.gov.au |
| **Adeegga Sharciga ee Aborijiniska Victoria** | Macluumaad sharci oo lacag la'aan ah oo loogu talagalay dadka Asaliga (Aboriginal) ah iyo dadka Torres Strait Islander ee ku sugan Victoria kaas oo ku saabsan arrimo badan oo sharci ah, oo ay ku jirto takoorid.<br>**Taleefanka** 1800 064 865<br>**Online** vals.org.au |
| **JobWatch** | Macluumaad sharci oo lacag la'aan ah iyo taageero ku saabsan arrimaha la xiriira xuquuqda shaqada, oo ay ku jirto takoorka.<br>**Taleefanka** (03) 9662 1933 (Magaaloweynta), 1800 331 617 (Gobolka Victoria)<br>**Online** jobwatch.org.au |
| **Gudida Cadaalada ee Shaqada** | Barnaamij caawimaad sharci oo lacag la'aan ah oo ku siinaya talo ku saabsan arrimaha sharciga oo ay ku jirto cagajuglaynta goobta shaqada.<br>**Taleefanka** 1300 799 675<br>**Online** www.fwc.gov.au |

Wixii macluumaad dheeraad ah, soo dejiso Guddiga *Tilmaamaha: Takoorka jinsiyadeed ee goobta shaqada* laga heli karo Humanrights.vic.gov.au/resources ama iyada oo loo marayo lambarka QR.

*Macluumaadkan waxaa loogu talagalay hagid ahaan kaliya. Ma aha beddelka talo sharci.*